



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

**WARSAXAAFADEED 21/2010**

### **ERGEYGA GAARKA AG EE XOGHAYAHA GUUD EE QARAMADA MIDOOBAY oo madaxda Soomaalida ugu hambalyeeyay ansaxinta Ra'iisal Wasaaraha Cusub**

Nayroobi, 31 October 2010 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Danjire Augustine P. Mahiga, ayaa maanta madaxda Soomaaliyeed ugu hambalyeeyay isafgaradka ay ku gaareen in Ra'iisal Wasaaraha la magacaabay lagu ansaxiyo hanaan wadatashi oo dimuqraadi ah.

“Iyadoo ku dhaqmaya Axdiga Federaalka Ku Meelgaarka ah, xildhibaanada Parlamaanku waxay muujiyeen inay doonayaan inay danaha qaranka hormariyaan, gaar ahaan xildhibaanada ka noqday mooshinkooda si ay u ogolaadaan in codayn furan la qaado, iyadoo dhowraya danta midnimada iyo xasilloonida,” ayuu yiri Danjire Mahiga.

Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay wuxuu Ra'iisal Wasaare Maxamed Cabdullaahi Maxamed ugu hambalyeeyay xilka cusub ee loo magacaabay wuxuuna ugu baaqay inuu hore u gudagalo ka hortaga caqabadaha horyaalla.

“Waxaan u hambalyeynayaa Ra'iisal Wasaare Maxamed waxaana ku boorinayaa inuu soo dhiso xukuumaddiisa si uu u dardargeliyo dhammeystirka hawlaha muhimka ah ee weli haray xilligan kala guurka.”

Danjire Mahiga wuxuu sidoo kale garowsaday taageerada iyo wada shaqaynta dhow ee bulshada caalamka, Midowga Afrika iyo Ururgoboleedka IGAD ay ku bixiyeen taageerada iyo dhiirrigelinta midnimada iyo iskuduubnaanta ka dhexeysa hay'adaha ku meelgaarka Soomaaliyeed.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

“Qaramada Midoobay, saxiibadeena, oo ay ka midyihiin Midowga Afrika iyo Ururgoboleedka IGAD iyo bulshada caalamkuba waxay sii wadi doonaan taageerada ay Hay’adaha Federaalka Ku Meelgaarka ah ku siiyaan dadaalka ay ugu jiraan sidii nabad iyo xasillooni dib loogu soo dabaali lahaa.”

Danjire Mahiga wuxuu sheegay inuu ku hanweynyahay in wadaninimada iyo midnimada hadda la muujiyay ay sii jiri doonto marxaladda soo socda ee ah dhismaha iyo ansaxinta xukuumadda uu Ra’iisal Wasaare Maxamed Cabdullaahi Maxamed dhowaan Barlamaanka hor keeni doono.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)